

Siddeedda mawduuc ee wadashaqaynta wanaagsan



Buuuyaraha wadahadalka waalidka
iyo dadka kale ee waaweyn

Sawir:
Johs Bøe
Tine Poppe
Lars Pettersen/Tinagent
Glenn Røkeberg
Scanpix Creative

Daabacaad:
www.flisatrykkeri.no

2017



Sidee ayaad ilmahaaga u aragtaa?

Si aad u ogaato in ilmahaagu yahay qof leh dareen, doonis iyo baahi isaga u gaar ah waa in aad fahantaa sida uu qofkaasi yahay - waa in aad "adigu ilmaha iska soo qaaddaa". Cilmi ahaan arrintan waxaa la yiraahdaa in la dareemo sida ay ilmuu dareemayaan Taas oo micnaheedu yahay oo keliya in aadan eegin waxa ay ilmahaagu samaynayaan, ee laakiin xataa aad isku daydo in aad fahanto sababta ay ilmuu sidaas u samaynayaan, iyo weliba baahida, fikirka iyo dareenka falalkooda ka danbeeyaa. Si aad u fahanto waa in aad is weydiisaa su'aasha ah: Haddii aan ilmahaan ahaan lahaa, maxaan dareemi lahaa, sideen u fikri lahaa ama dooni lahaa?

Adigu qofka aad tahay, ayaa saamaysa sida aad ilmaha u aragto

Waxyalo badan ayaa go'aamiya sida aad ilmahaagu u aragto. Waxaa tuaale ahaan adiga laftigaaga ku saamaynaya waxyaalihii ku soo maray markii aad carruurta ahayd. Sida ay xaaladdaadu tahay xag bulsho iyo xag dhaqaale ayaa iyaguna muhiim ah. Waxaa kale oo saamayn kugu yeesha dhaqanka, diinta iyo waxyalaha kale ee shakhsii ahaan muhiimka kuu ah ee aad xambaarsan tahay. Saamayntani waxay noqon kartaa mid aad ku baraarugsan tahay ama mid aadan ku baraarugsanayn. Waxyalaahan oo dhan waxay qayb ka qaadanayaan sida aad ilmaha u aragto.

Dabciga ilmaha ayaa asna meesha soo gelaya

Waxaan kulligeen leennahay hab falcelin oo noo gaar ah - dabci. Dabciga ilmahaaguna wuxuu saameeyaa sida aad ilmaha u aragto. Ilmuu ma ilmo deggan oo si fudud loo qancin karraa, mise waa ilmo qalqaali ah? Ma firfircoona yahay? Ma mid madaxbannaan baa? Waxaa kale oo aan inta badan samaynaa in aan ilmaha shaabbadayno annaga oo eegayna habdhqaankooda. Waxaa tuaale ahaan dhacda in aan niraahno ilmahaasi waa qaylo badan yahay, ama aammusun yahay ama dhib badan yahay. Mararka qaarkood hal sifo ayaan inta ku dhegno ayaan halkaas fikrad oo keliya ilmaha ka qaadannaa. Sida aad ilmahaaga u aragto ayay ku xiran tahay sida aad u qaabbilayo.

Waxa aad aragto oo ku fikirayso, iyo waxa aad siinayso waa isku xiran yihiin

Sida aad ilmahaaga u aragto oo u fahanto ayay ku xiran tahay sida aad adiga iyo ilmuu isku tiihin. Middaas ayaana aasaas u ah daryeelka aad ilmaha siinayso. Ilmo kasta wuxuu u baahan yahay in uu xiriir wanaagsan oo laysku hubo waalidkiis la yeesho. Xiriirkaas ayaa ah aasaaska ay marka danbe noloshooda ku dhisayaan.

Ilmahaaga u muuji in aad jeceshahay



Sidaada oo kale ayuu ilmahaagu u baahan yahay in uu dareemo in la jecel yahay oo la doonayo si uu kalsooni u dareemo. Ilmahaaguna ma akhriyi karo waxa dadka qalbigooda ku jira sida aadan adiguba u akhriyi karin. Sidaas darteed ayay aad muhiim u tahay in aad ilmaha u muujisid in aad jeceshahay, oo aad afka uga sheegtid ficol ahaanna u tustid. Xataa ilmaha yaryar ee aan weli hadalka baran ayay khusaysaa arrintani. Maxaa yeelay way dareemi karaan farxadda iyo murugada, wayna fahmayaan jacaylka iyo diidmada. Carruurta kuwooda weyn iyo kuwa yarba way akhristaan oo fasirtaan waxa aad u jeeddo, waxayna sidaas sameeyaan iyaga oo eegaya sida aad wejiga ka dhigayso iyo qaabka codkaaga.

Sidee ayaad ilmahaaga ugu muujin kartaa in aad jeceshahay?

- adiga oo ilmaha la ilka-caddaynaya oo la qoslaya
- adiga oo ilmaha hab siinaya ama garabka ka taabanaya
- adiga oo ilmaha u sheegaya in aad jeceshahay
- adiga oo ilmaha la ciyaaraya
- adiga oo markaad la hadlayso ilka-caddaynaya
- adiga oo ilmaha u laabqaboojija, caawiya oo dejija
- ...

Ka fikir:

- Waa sidee sida kuugu dabiiican ee aad ilmahaaga ugu muujin karto in aad jeceshahay?
- Maxaad u malaynaysaa in ay ilmahaagu kugu fahmi karaan in aad jeceshahay?
- Waa maxay waxa aad ilmahaaga ugu jeceshahay?
- Ma jiraan wax intan ka badan oo aad qaban karto si aad ilmahaaga ugu muujiso in aad jeceshahay?

Isku day in aad xasuuusasto sida aad waxyaalahan maalin walba ilmaha ugu muujiso, oo bal u firso sida uu ilmuhi uga falceliyo.

Arag oo la soco tillaabooyinka ilmaha



Ka fikir:

- Sidee ayaad ilmahaaga ugu heellan tahay?
- Ma jiraan wax keena in ilmahaagu dareemi karo in aan loo soo jeedin, tusaale ahaan teleefanka gacanta ama TV-ga?
- Sidee ayuu ilmahaagu u falceliyaa markaad isaga u jeesato?
- Sidee ayuu ilmuuhu u falceliyaa marka uu isku dayo in uu kula hadlo, laakiin uu jawaab kaa waayo?
- Luuqadda jirka ee ilmaha wax ma kaaga sheegi kartaa sida uu ilmuuhu dareemayo?

Isku day in aad xasuuusasto sida aad waxyaalahan maalin walba ilmaha ugu muujiso, oo bal u firso sida uu ilmuuhu uga falceliyo.

Si aad ilmahaaga hab wanaagsan wakhti ula qaadato kuma filna in aad meel la joogto oo keliya. Waa in ay maskaxdaaduna la joogtaa. Haddaan nahay dad waaweyn, marar badan ayay maskaxdannadu meel kale ku maqan tahay, waxaa tusaale ahaan dhici karta in aan teleefan ku mashquulno ama aan ka welwelsan nahay waxyaalihii badnaa ee aynaan qabashadooda wakhti u helin. Laakiin haddii aad rabtid in aad ilmahaaga wakhti siiso, waa in aad xaaladda la qabsataa oo aad la falgashaa waxa uu ilmuuhu xiisaynayo, sida uu u fikirayo iyo dareenkiisa.

Carruurtu waa in ay raacaan fikradahooda, oo waxa ay qabanayaan ay u qabtaan sida ay ayagu rabaan - iyagoo ku dhex jira xad laysla oggol yahay. Waa sidaas sida ay ku koraan. Sidaas darteed waa muhiim in aadan carruurtu wax walba adigu u go'aamin, laakiin aad taageertid oo guubaabisid, islamarkaana ilmaha siisid wakhti uu ku fikiro. Marka aad raacdoo tillaabada ilmuuhu qaaday, wuxuu ilmuuhu arkayaa in uu isagu tillaabo qaadi karo, iskiis wax u samayn karo oo uu saamayn yeelan karo. Marka ay wadashaqyn wanaagsan jirto adiga iyo ilmuuhu waa siman tiihin, labadiinnuba xaq baad u leedhihiin in aad sheegtaan haddii ay jiraan wax aydhaan ka helin. Taas micnaheedu ma aha in ay ilmuuhu ku hoggaaminayaan. Adiga weyn ayaa wadashaqaynta mas'uul ka ah.

Sidee ayaad u arki kartaa oo u raaci kartaa tillaabooyinka ilmaha?

- adiga oo ka jawaabaya tillaabada ilmaha
- adiga oo muujinaya in aad xiisaynayo waxa ilmuuhu samaynayo
- adiga oo fasiranaya luuqadda jirka ee ilmaha
- adiga oo ogaanaya doonista iyo dareenka ilmaha
- adiga oo ka jawaabaya doonista iyo dareenka ilmaha
- adiga oo la qabsanaya jawiga iyo doonista ilmaha ilaa iyo inta suuraggalka ah
- ...

Tixgeli dareenka ilmaha

Ma ka fikirtay xasaasiyadda uu leeyahay allaarmiga ilmaha yaryarka ah? Marka ay xasilloonidarro dareemaan way ooyaan, si aan ugu nimaanno oo u dejinno. Carruuta waaweyn laftigoodu waxay u baahan yihiin laga caawiyo sidii ay u fahmi lahaayeen in aan dareenku khatar ahayn, laakiin yahay wax dabiici ah oo caadi ah.

Ilmo baqaysa, waxay u baahan tahay cid u sheegta in aaney jirin wax ay ka cabsooto oo ay dareento ammaan. Ilmo wax dhabsanaya, wuxuu u baahan yahay cid u laabqaboojisa. Isla sidaas oo kale ayuu ilmaha dhawr iyo tobantirka ahi u baahan yahay in la fahmo marka uu ka khajilo biraha ilkaha lagu simo, si ay ilkuhu u qurux badnaadaan.

Haddii uu ilmahaagu xanaaqo oo caroodo xad lagama maarmaan ah oo aad u dhigtay dartiis, wuxuu u baahan yahay in laga caawiyo sidii uu isu dejin lahaa. Wuxuu kale oo u baahan yahay in dareenkiisa fahan laga muujiyo. Haddii aad tusaale ahaan dukaanka tagto ayada oo uu kula socdo afar jir nacnac raba, waxaad dhihi kartaa: «Waan fahansanahay in aad hadda nacnac rabto, laakiin suurtaggal ma aha.» In aad fahansan tahay dareenka ilmaha lama mid ah in aad wax ka beddelayso xadkii aad dhigtay. Laakiin taasi waxay ilmaha u fududaynaysaa in uu xadka aqbalo marka aad u sharraxdo sababta aad ugu diidday, oo aad u sheegto in aad fahansan tahay in ay arrintani ilmaha ku adag tahay.

Ilmahaaga la hadal - laga billaabo marka uu dhasho

Xataa saqirka yar waa u suuraggal in uu dadka la yeesho waxa loogu yeero «**wadahadal dareen xambaarsan**», oo laga wado in loo wada hadlayo hab dareen ah. Iyada oo indhaha layska eegayo, farxad laysu muujinayo oo dhaqdhaqaaq

wanaagsan la samaynayo ayuu ilmuu kugu xirmayaa. Marka aad ku celiso calaamadihi uu dareen ahaanta ilmuu u miijiyay, ayuu saqirku arkayaa in aad aragtay oo fahantay waxa uu doonayo in uu kuu soo gudbiyo. Xiriirkan aan ereyada la isticmaalayn wuxuu aad iyo aad muhiim ugu yahay sidii uu ilmuu mustqabalka u baran lahaa luuqad iyo aqoon bulsho, si kalsoon iyo ammaan leh oo wanaagsanna ugu gudbin lahaa dareenkiisa. Sidaas darteed marka aad saqirkaaga la hadlayso isku day in aad jirka oo dhan isticmaasho - afka, indhaha iyo gacmaha.

Xiriir soke oo wanaagsan oo adiga iyo ilmaha idin dhex Mara ayaa si sidaa la mid ah muhiim u ah marka uu ilmuu sii koraba. Xataa carruuta waaweyn waa nugul yihiin oo waxay u baahan yihiin daryeet iyo laabqaboojin, kuwaas oo aad siinaysid adiga oo ula hadlaya si fiican oo ay dareemaan in ay si xor ah uga hadli karaan arrimo shakhxi ahaan iyaga khuseeya. Sidaas darteedna waa muhiim in uu ilmahaagu wuxuu rabo kuu sheegi karo.

Sidee ayaad ilmaha dareenka ula qaybsan kartaa?

- adiga oo wakhti siinaya in aad saqirkaaga la «hadasho»
- adiga oo indhaha ka fiirinaya oo saqirka kaga dayanaya luuqadda jirka iyo sanqarta
- adiga oo ilmaha u laabqaboojinaya haddii uu wax dhibsado - haddii uu saqir yahay iyo haddii uu ilmo weyn yahayba
- adiga oo ilmaha cabsida ka bi'inaya haddii uu cabsoodo
- adiga oo ilhama dejinaya haddii ay caraysan tahay
- adiga oo ilmaha diyaar u noqda haddii uu doonayo in uu gaar kuula hadlo
- ...

Ka fikir:

Iksu day in aad xasuuusasto sida aad waxyaalahan maalin walba ilmaha ugu muujiso, oo bal u fiirso sida uu ilmuhi uga falceliyo.

Ammaan iyo ixtiraam siin

Carruurta oo dhan, xataa kuwa saqjirrada ah, waxay u baahan yihiin in lagu ixtiraamo qofka ay yihiin, iyo in lagu ammaano waxa ay qabtaan. Haddaba, sidaas darteed ilmahaaga ammaan marka ay mutaan - oo xataa waxyaalo yaryar ku ammaan. Ammaanta iyo ixtiraamku waxay muhiim u yihiin sidii uu ilmuu u fahmi lahaa in aad qimaynayo qof ahaantiisa, iyo in uu yeesho **isku kalsooni** wanaagsan iyo **dareenka qofeed** oo uu iska qabo oo wanaagsanaada. Ilmuu marka la ammaano waxay dareemaan in ay qiime leeyihiin oo ay wax qaban karaan. Waxaa iyana muhiim ah in aad u sheegto waxa fiican iyo sababta. Markaas ayuu ilmuu yeelanayaa **isku kalsooni dhabta ku salaysan**.

Haddii aad ilmaha ammaanto marka ay qof kale asxaan u sameeyaan, waxaad ilmaha ka caawinaysaa in ay yeeshaan aqoon bulsho. Sidaas ayayna ilmuu ku baranayaan habdhaqanka bulsho ee wanaagsan iyo kan aan wanaagsanayn.

Sidee ayaad u ammaani kartaa oo ixtiraam ugu muujin kartaa?

- adiga oo ilmaha tusaya in aad «aragto» - oo indhaha ka firiya
- adiga oo ixtiraamka la xiriiriya wax la taaban karo oo aad wada qabateen labadiinnu



(«maanta wakhti fiican ayaan kula qaatay», «waan arkaa in aad sidan ka hesho»)

- adiga oo ilmaha u sheegaya waxa fiican iyo sababta ay u fiican yihiin («waa fiicnayd, maxaa yeelay marka aad sidaas samayso, markaas ...», «waa wax wanaagsan in aad walaalkaa kaa yar caawiso, maxaa yeelay markaas ...»)
- adiga oo ilka caddayn, salaan iyo taabasho wanaagsan u isticmaalaya in aad wax ku xaqijiso
- ...

Ka fikir:

- Maxaad ammaan u taqaannaa?
- Maxaad samaysaa marka uu qof ku ammaano?
- Ilmahaaga aalaaba ma ammaantaa? (Keen tusaale muujinaya sida aad u ammaanto)
- Ilmaha ma dhaawici kartaa in aan la ammaanin? Ama in ammaanta laga badiyo?
- Ilmahaagu sidee buu uga falceliyaa ammaanta iyo ixtiraamka?
- Sidee ayaad u malaynaysaa ilmo aan waalidku waligood ammaanin in uu dadka kale ula dhaqmayo?
- Sidee ayaad u ammaani kartaa oo ixtiraam ugu muujin kartaa ilmo saqir ah?

Isku day in aad xasuusasto sida aad waxyaalahan maalin walba ilmaha ugu muujiso, oo bal u firso sida uu ilmuu uga falceliyo.

Ereyada isku kalsoonni iyo dareenka qofeed isku si aayaan u isticmaalnaa. Dareenka qofeed wuxuu wax ka sheegayaa ilaa iyo inta aad adigu is jeceshay, iyo qiimaha aad isla leedahay. Isku kalsoonidu waa sida aad isu aragto marka aad eegto waxyaalaha aad ku guulaysatay iyo waxa aad is leedahay waad kari kartaa. Marka ay isku kalsoonidaadu tahay mid dhabta ku salaysan, ayaad sawir sax ah ka haysataa waxa aad qaban karto.

Feejignaan guud – isku si wax u arkid



In wax la wada arko ayaa shardi u ah in xiriir iyo wadahadal fiican la yeesho, maxaa yeelay had-dii aan waxyaalaha agagaarka isku si loo arkin, way adkaanaysaa in la wada hadlo ama wax la wada qabto. Arrintani waa billow wanaagsan oo lagama maarmaan ah si wax loo barto:

Carruurta iyo dadka waaweyni inta badan waxyaalo kala duwan ayay ku mashquulsan yihiin: Tusaale ahaan cagaf dhulka qodda oo waddada dhinaceeda kale taagan ayaa ilmaha uga xiise badnaan karta inaad u sharraxdo sida ay nalalka samaanfaluhu u shaqeeyaan. Xaaladaha noocaas oo kale ah adiga qofka weyn ah ayaa hubin kara inaad isku wax u jeesataan si aad markaas isku si ugu aragtaan waxa aga-gaarkiinna ka dhacaya. Waaad tusaale ahaan taas samayn kartaa adiga oo inta farta taago yiraahda: «Eeg halkaan!» Ama adiga ayaa u jeesan kara waxa uu ilmuu ku sii jeedo. Sidaas ayaadna ilmaha ku tusaysaa in waxa uu arko ay muhiim yihiin.

Marka aad ilmaha ka caawiso in feejignaanta meel la i sugu geeyo, keliya ma aha inaad ka caawinayso inaad isku wax eegtaan. Ee waxaad sidoo kale ilmaha ka caawinaysaa inuu ku

tababbarto sidii uu wax ugu dhug yeelan lahaa. Dhug yeelashadu waxay shardi u tahay sidii uu ilmuu wax u fahmi lahaa oo wax cusub u baran lahaa.

Sidee ayaad ilmaha uga caawin kartaa in uu feejignaan yeesho?

- adiga oo ku fikira inaad xaalad isku si aragtaan
- adiga oo ilmaha ka caawiya inuu feejignaantiisa u duwo waxa aad doonaysid inaad wada aragtaan, tusaale ahaan adiga oo farta ugu fiiqaya, isku dayaya inaad isha ku qabato oo tiraahdo «kaalay» ama «arag»
- aad la socoto waxa uu ilmuu xiiseeyo oo aad samayso sida uu jecel yahay
- ...

Ka fikir:

- Adiga iyo ilmahaagu ma wada qaadataan wakhti aad ku aragtaan wax idin xiisa geliya?
 - Ka bixi dhawr tusaale sida aad ilmahaaga uga caawin karto sidii uu feejignaantiisa meel isugu geyn lahaa. Sidaa ayuu ilmuhi u falceliyaa?
 - Sidee ayaad u malaynaysaa in uu noqon doono ilmo aan mar dhif ah ma ahee marna laga caawin sidii uu feejignaantiisa meel isugu geyn lahaa?

Isku day in aad xasuusasto sida aad
waxyaalahan maalin walba ilmaha ugu
muujiso, oo bal u fiirso sida uu ilmuuhu uga
falceliyo.

Ilmaha la wadaag waaya aragnimadaada

Si uu ilmuu u fahmo waxa aad wadajirka ula kulmaysaan, oo uu kuwaas ula xiriiriyo waxyaalaha kale ee uu la kulmo, waxaa muhiim ah in aad u sheegto waxa magacooda, oo aad u sharraxdo sida ay yihiin. Marka aad dareen wanaagsan muujiso oo aad tahay qof xiisaynaya waxa ay samaynayaan, ayaad ilmahana ka caawinaysaa in uu xasuusto wixii aad la kulanteen. Waxaad gacan ka geysanaysaa in ay taasi noqoto mid muhiim ah oo micno leh.


Marka ay ilmuu aragto in ay «dhabta» kula wadaagto waxay dareentaa in aad luuqadda xataa wadaagtaan, oo ay ereyadu dadka kale u leeyihiin micne la mid ah kan ay ayada u leeyihiin. Waxay barataa in waxyaalaha la taaban karo ay leeyihiin magac sida «guri» iyo «raashin», iyo weliba in ay magac u barato waxyaalaha aan la taaban karin sida dareenka.

Waxaa muhiim ah in aad adiga waalidka ah ilmaha ka caawiso sidi ay magac ugu yeeli lahaayeen una fahmi lahaayeen dareenka kala duwan ee la socda waxyaalaha dhacaya. Wuxaa tusaale ahaan dhihi kartaa: «Waxaan u malaynayaa in uu walaalkaa kaa yar ka xumaaday in aanu na soo raacin.»

Xataa carruurta waaweyn waxay u baahan yihiin cid ay la hadlaan marka ay la kulmaan wax ay ku adag tahay in ay fahmaan, sida in la dhibo (mobbing), geerida ama dhacdooyin waaweyn oo saxaafadda ku soo baxa.

Sidee ayaad ilmaha uga caawin kartaa in ay micnaha fahmaan?

- adiga oo ilmaha kala hadlaya waxa aad wadajirka ula kulantaan



Ka fikir:

- Keen dhawr tusaale oo tusaya sida arrintan gacanta looga qabto. Sidee ayuu ilmuu u falceliyaa?
- Haddii aanu ilmuu lahayn cid ka caawia sidii ay waxyaalaha uu la kulmo micne ugu samayn lahaayeen, sidee ayaad u malaynaysaa in uu ilmahani noqonayo?
- Sidee ayaan micnaha ugu sheegi karnaan carruurta ay da'doodu kala duwan tahay? (saqir, 3 sano jir, 14 sano jir)?

Isku day in aad xasuusasto sida aad waxyaalahan maalin walba ilmaha ugu muujiso, oo bal u fiirso sida uu ilmuu uga falceliyo.

- adiga oo u sharraxaya una sheegaya magaca waxa aad aragtaan
- adiga oo ilmaha tusaya sida wixi u shaqeeyaan
- adiga oo xiise iyo rabis u muujinaya waxa aad wadajirka ula kulantaan
- ...

Marka aad magac u yeesho waxa ay ilmuu arkayaan ama la kulmayaan, waxaad ilmaha ka caawinaysaa in uu fahmo waxa agagaarkiisa ka dhacaya, luuqadda barto, dadka kale la dhaqmo oo kalsooni helo. Tani waa mid aan dhab ahaantii in badan samayno annagoo aan is ogayn, laga billaabo marka ay carruurtu aadka u yaryar yihiin.

Samee isku xirid



Waalidka ayaa ah macallimiinta ugu muhiimsan carruurtooda. Waalidka ayaa carruurta bara in ay xiiseeyaan waxyaalaha ku xeeran oo ay bartaan waxyaalaha aanay aqoonnin. Carruurtu waxay billaabaan in ay wax bartaan wax badan ka hor intaysan iskoolka billaabin.

In aqoonta iyo khibradda la kororsado oo laysku xiro waxay muhiim u tahay horummarka ga-raadka ilmaha, taas oo loola jeedo horummarka awoodda waxbarashada. Marka aad ilmaha ka caawiso in uu isku xiro waxyalo uu horey ula soo kulmay iyo kuwo cusub («ma xasusataa in ...», «waa taas darteed sababta aan hadda ...»), xiriirka labada wax ka dhexeeya ayuu ilmuu fahmayaa oo waxaa u fududaanaysa in uu la qabsado waxyaalaha aan la taaban karin sida erey iyo weero. Ka soo qaad in aad adiga iyo ilmuu bannaanka maraysaan, markaas ayaad bisad aragteen. Bisadda ayaad inta farta ku taa-gto ayaad u sheegi kartaa in ay shabeelka isku qoys yihiin. Waxaa weliba fican in aad ilmahe weydiiso: «Ma aragtaa meelo ay bisadda iyo shabeelku isaga eeg yihiin?» Markaas waxaad ilmaha ka caawinaysaa in uu arko xiriirka ka dhexeeya oo uu u fikiro in dhaafsiisan xaaladda hadda. Arrintani waxay aad iyo aad muhiim ugu tahay sidii ay carruurtu u kobcin lahaayeen awoodda garaadkooda, taas oo looga jeedo awoodda fahanka, waxbarashada iyo fikirka. Waxaa kale oo ay muhiim u tahay kobcinta luuqadda.

Sidee ayaad ilmahaaga uga caawin kartaa in ay wax isku xiraan?

- adiga oo wax u sharraxaya, u sheegaya oo helaya sababta ay wax u dhacaan
- adiga oo u sharraxaya oo ilmaha kala hadlaya wixii uu la soo kulmay
- adiga oo barbardhiga wax kale oo lala soo kulmay, dabadeedna hela isu ekaanshaha iyo kala duwanaanshaha
- adiga oo helaya xiriirka ka dhexeeya markii hore iyo mustaqbalka
- adiga oo sheeko ka samaynaya wixii aad la kulanteen kaddibna uga sheekaynaya
- adiga oo sawir gacmeed sawiraya, heesaya, isla daawanaysaan sawirrada waxyaalaha aad aragtaan
- ...

Ka fikir:

- Keen dhawr tusaale oo tusaya sida arrintan ga-canta looga qabto.
- Sidee ayaad ilmo jira hal sano, toddoba sano ama laba iyo toban sano uga caawin kartaa in uu arko xiriirkha laba wax ka dhexeeya?
- Sidee ayuu noqonayaa ilmo aan mar dhif ah ma ahee loo sharixin waxa dhacaya?
- Ma u malaynaysaa in aad ku fiican tahay in aad inta hadalka joojiso aad wax u sharraxdo marka uu ilmahaagu wax ku weydiyo?

Isku day in aad xasuusato sida aad waxyaalahan maalin walba ilmaha ugu muujiso, oo bal u firso sida uu ilmuhu uga falceliyo.

Caawi si uu isu caawiyo

In ilmaha nidaam loo yeelo ma aha in xad loo dhigo oo keliya, laakiin waa in laga caawiyoo sidii ay iskood wax u qiimayn lahaayeen oo ay lugahooda isugu taagi lahaayeen. Si ay tan u gaaraan waxay u baahan yihii in laga caawiyoo sidii ay nidaam u baran lahaayeen oo isu koontarooli lahaayeen. Xad dhigistu waa uun mid ka mid ah dhawr wax.

Mawduucani wuxuu ka kooban yahay afar qaybood, wuxuuna ku saabsan yahay qorshaynta, caawinta, u suuragelinta iyo xad wanaagsan u dhigista.

Qorshayn



Waxyaalaha ilmaha ka caawiya in uu barto in uu is koontaroolo, ayaa ah in uu horey eegi karo oo dareemi karo waxa soo socda. Haddii aad waxyaalaha la qabanayo tillaabo tillaabo ilmaha ula qorshaysid waxaad ka caawinaysaa kobcinta awoodda uu iskiis wax ugu qorsheyn karo oo uu la socdo tillaaboo yinka yaryar illaa laga gaarayo hadafka. Lugabaxsi kaynta lagu tagayo ayaa ahaan kara firfircooni wanaagsan oo aad isla qorshayn kartaan? Maxaan u baahannahay si aynaan u qarqarin? Raashin intee dhan ayaan u baahannahay? Xaggeen maraynaa? Maaddo ahaan kuwan waxaan ugu yeernaa **khariidadda garaadka**.

Khariidadda garaadku waxay ilmahaaga u fududaysaa sidii ay muddo dheer ugu mashquuli lahaayeen gaaridda hadaf. Haddii aad ilmaha ka caawiso in ay nidaam wanaagsan u samaysato hawlaha joogtada ah sida hurdada, cuntada iyo shaqada cashirrada, waxaad siinaysaa fursad

wanaagsan oo ay nolosheeda ku samaysato nidaam iyo wax horey loo sii ogaan karo.

Sidee ayaad ilmaha uga caawin kartaa in ay lugahooda isku taagaan?

- adiga oo ilmaha bara in uu tillaaba tillaabo wax u qorsheeyo
- adiga oo dhiga hadaf uu ilmuu gaari karo adiga oo caawinaya
- adiga oo u sameeya nidaam joogto ah oo wanaagsan (hurdo, cunto, shaqada cashirka guriga i.w.m.)
- ...

Ka fikir:

- Sidee ayaad ilmahaaga uga caawinaysaa in uu tillaaba tillaabo wax u qorsheeyo?

Isku day in aad xasuusasto sida aad waxyaalahan maalin walba ilmaha ugu muujiso, oo bal u firso sida uu ilmuu uga falceliyo.

Taageerid



Carruurtu kulligood waxay u baahan yihiin in la caawiyo si ay si wanaagsan ugu koraan. ICDP waxaan isticmaalnaa weeraha **caawimada kala duwan**, taas oo laga wado in ilmaha la caawiyo marka uu u baahan yahay, laakiin caawinta laga joojiyo marka aad aragto in uu ilmuuhu wixii ka adag yahay. Caawinta oo laga badiyo waxay keentaa in uu ilmaha shaki ka galo waxa uu karo, wuxuuna u baahanaya in la sii caawiyo si uu wax cusub isugu dayo. Caawinta oo intii la rabay ka yarna waxay keentaa in uu ilmuuhu nacas isu maleeyo maaddaama uu ku guulaysan waayay wixii uu qabanayay.

Baridda ilmaha ee wadista baaskiilkayaa tuaale fiican u ah caawinta kala duwan. Baaskiilkayaa qaybta dambe ayaan qabannaa, laakiin waxaan sii deynaa markaan aragno in uu ilmuuhu dheeellitir sax ah helay. Markaas ayaan haddana degdeg baaskiilkayaa gadaal u qabannaa markuu billaabo in uu la dhacdhaa.

Sidee ayaad ilmahaaga hab wanaagsan ugu caawin kartaa?

- adiga oo ilmaha caawinaya keliya inta uu u baahan yahay
- adiga oo ilmaha tusaya in uu wax qaban karo oo isku filan yaha

Ka fikir:

- Sidee ayaad ilmaha caawinta uga badin kartaa?
- Ma dhacdaa in aad ilmahaaga caawiso intii loo baahnaa in ka yar?

Isku day in aad xasusasto sida aad waxyaalahan maalin walba ilmaha ugu muujiso, oo bal u firso sida uu ilmuuhu uga falceliyo.

Caawin

Carruurtu ayaga oo yaryar ayay bartaan in ay xad isu yeelaan xaaladaha kal duwan. Tusaale ahaan guriga marka ay joogaan waxay u dhaqmaan si ka duwan sida xannaanada carruurta ama iskoolka. Mararka qaarkood waxay u baahan yihiin in laga caawiyo sidii ay xad isugu yeeli lahaayeen sida marka uu khilaaf ka dhaco barxadda ciyarta ee iskoolka. Markaas oo kale adiga qofka weyn ah waxaad isticmaali kartaa waxa aan ugu yeerno **xadaynta xaaladda**, taas oo laga wado in aad xaaladda wax ka beddesho meeshii aad ilmaha wax ka beddeli lahayd, oo waxaad wax ka beddelaysaa ciyarta ama xeerarkeeda. Marka ay carruurtu arkaan in ay arrintu sidii hore ka fiican tahay kaddib marka xaaladdu is beddesho, habdhqaankooduna wuu fiicnaadaa.

Sidee ayaad ilmaha uga caawin kartaa in uu isagu xad isu yeelo?

- adiga oo xaaladda wax ka qabanaya meeshii aad ilmaha wax ka qaban lahayd
- adiga oo xeerkax wax ka beddelaya
- diga oo ilmaha kala hadlaya habab kala duwan oo xaalad wax looga qabto
- ...

Ka fikir:

- Maxay muhiim u tahay in xaaladda wax laga qabto meeshii ilmaha wax laga qaban lahaa?

Isku day in aad xasuusasto sida aad waxyaalahan maalin walba ilmaha ugu muujiso, oo bal u firso sida uu ilmuuhu uga falceliyo.



In loo dhigo xedad wanaagsan



Way adkaan kartaa in carruurta xad loo dhigo, laakiin haddana waxay lagama maarmaan u tahay sidii ay u baran lahaayeen **fahamka mooralka, dareenka xaaladda dadka kale** iyo dareenka mas'uuliyadda. **Xad-dhigista xun**, sida mammuucidda iyo ciqaab ugu hanjabidda, mustaqbalka fog haba yaraatee waxba ma taraan. Haddii aad doonaysid in uu ilmuu wax qiiame leh xad-dhigista ka barto, waa in aad isticmaashaa waxa loo yaqaan **xad-dhigista wanaagsan**. Taas oo ah in xadka loo dhigo habuu ilmuu u arko mid macquul ah oo caawinaya. Waaadna sidaas samayn kartaa adiga oo u sharraxya sababta aad xadka ugu dhigeyso, iyo weliba adiga oo ilmaha kala doorransiinaya hawlo kala duwan. Carruurta kuwooda waaweyn waxaa wanaagsan in iyaga lagala hadlo meesha xadku marayo. Waxay markaas dareemayaan in ay go'aanka wax ku leeyihiiin, oo arrintooda mid dhab ah laga soo qaaday.

Marka aad xad wanaagsan ilmaha u dhigto, waxaad ka caawinaysaa in ay fahanto waxa saxda ah iyo waxa khaladka ah. Markaas ayay iskeed u qaadanaysaa go'aammadii saxda ahaa, tusaale ahaan in aysan dukaanka wax ka xadin

Dareenku waa wax lays qaadsiyo. Gaar ahaan carada ilmaha ayaa keeni karta in ay dadka waaweyn na carroodaan. Shaqada ugu adag ee annaga dadka waaweyn ah noo taalla ayaa taas darteed waxay tahay in aan annagu is dejinno ka hor intaynaan carruurta dejin. Maxaa yeelay si aan carruurta xad ugu dhigno horta waa in aan annagu xad isu dhigi karno. In kasta oo aan kacsannahay, waxaa haddana muhiim in aan nahay kuwo deggan marka aan xadka dhigeyno.

- ma aha in ay ciqaab ka baqayso, ee waa in ay fahansan tahay in ay taasi khalad tahay.

Sidee ayaad ilmaha xad wanaagsan ugu dhigi kartaa?

- adiga oo u sharraxya sababta aaad xadka ugu dhigeyso
- adiga oo ilmaha siinaya wax uu kala doorto
- adiga oo ilmaha wadaxajood la gelaya
- ...

Ka fikir:

- Muxuu xadku ilmaha muhiim ugu yahay?

Isku day in aad xasuusasto sida aad waxyaalahan maalin walba ilmaha ugu muujiso, oo bal u firso sida uu ilmuu uga falceliyo.

Sharraxaadda ereyada

Wax aan la taaban karin	wax lagu fikiray, beddelka wax la taaban karo
Aqoonsasho	In aad ilmaha tusto in aad sidiisa ku jeceshahay
Dareenka xaaladda dadka kale	In aad iska soo qaadi karto xaaladda qof kale ku sugan yahay oo aad dareemi karto waxa uu qofkaasi dareemayo
In la dareemo xaaladda qof kale	In la fahmo sida ay tahay in la ahaado qof kale
Wadahadal dareen	Wadahadal lagu wada hadlayo hab dareen ah
Ilmaha oo si wanaagsan loola qabsado	In daryeel iyo u dhawaansho loo muujiyo, laakiin islamarkaana wax laga fisho xadna loo dhigo
Caawin kala duwan	In ilmaha la caawiyo marka uu caawinta u baahan yahay, laakiin caawinta laga joojiyo marka uu xaaladda ka adkaado
Horummar garaad	Horummarka awoodda waxbarashda
Awoodda garaadka	Awoodda fahanka, waxbarashada iyo fikirka
Khariidadda garaadka	waa awoodda loo leeyahay in la qorsheeyo oo la ogaado tillaabooyinka hadaf lagu gaaro
Fahanka mooralka	In la fahmo farqiga u dhixeyya saxda iyo khaladka, habdhqaanka fiican iyo kan xun
Xad-dhigis xun	In xad la dhigo iyada oo mamnuucid iyo ciqaab lagu hanjabayo
Xad-dhigis wanaagsan	In xad loo dhigo hab uu ilmuu u arko mid macquul ah oo caawinaya
Kalsooni dhabta ku salaysan	Sawir sax ah oo waxa aad qaban karto ah
Ammaanid	Dareenka qofeed wuxuu wax ka sheegayaa ilaa iyo inta aad adigu is jeceshay, iyo qiiimaha aad isla leedahay
Isku kalsooni	Isku kalsoonidu waa sida aad isu aragto marka aad eegto waxyaalah aad ku guulaysatay iyo waxa aad is leedahay waad kari kartaay
Xadaynta xaaladda	In la beddelo xeerarka xaaladda si carruurta looga caawiyo in ay wax ka adkaadaan
Dabci	Hab baxaalli ah ee wax loo dareemo loona falceliyo

In la wada shaqeeyo si loo wada hayaago

In ilmo la barbaariyo waa shaqooyinka ugu muhiimsan uguna adag ee qofka soo mara. Ilmuu ma aha adiga oo yar, ee waa qof goonidiisa ah oo ay tartiib tartiib shahsiiyaddiisa u samaysmayso oo iskiis isu taagaya. Marka aad tahay qof weyn kaalintaadu waa in aad ilmaha taageerto ahaataana waalid ilmihiisa jecel, laysku hallayn karo oo warkisu cad yahay. Marka aad ilmaha daryeelka iyo u dhawaasha-ha u muujinayso, waa in aad haddana xad u dhigtaa oo aad ilmaha ka caawisaa in ay kalsooni helaan oo lugahooda ku istaagaan. Sidaas ayaan ka wadnaa marka aan leennahay **wadashaqayn fiican** oo dhex marta dadka waaweyn iyo carruurta.

ICDP – caawin lagu helo habab fiican oo wakhti lagu wada qaato

ICDP (International Child Development Programme) waa barnaamij waalidka lagula taliyo oo ay diyaariyeen khuburo ka kala timid dalal badan, kuna dhisan sannooyin badan oo cilmibaaris ah. Wuxuu ku saabsan yahay waxyaalo badan oo adag oo ay waalidku la kulmaan, iyo istiraatiijyado xiriir fiican oo wanaagsan ay ku yee-shaan waalidka iyo carruurtu. Marka aad barnaamijka ka qaybqaadato waxaad la kulmaysaa kooxo waaliddiin ah oo kale kuwaas oo aad khibradaha iyo fikradaha is weydaarsan kartaan. Sidaas ayaadna gacan uga geysanaysaan in aad maalinta waalidka ka dhigtaan mid ay kalsooni ku dheehan tahay, waxaadna heli kartaa fikrado cusub oo ah sidii aad ilmahaaga ula xiriiri lahayd.

Buugyarahaa wadahadalka «Siddeedda mawduuc ee wadashaqaynta wanaagsan» waa buug cashirrada looga shaqeeyo oo kullamada kooxda lagu isticmaali karo iyo «xusuusqor» wanaagsanaan kara marka ay kullamadu dhammaadaan. Buugyarahaa waxaad ku baranaysaa korriinka ilmaha, iyo baahidooda wejiyada korriinka ee kala duwan. Inta barnaamijka lagu jiro ayaa lagaa codsan doonaa in aad ka fikirtid qay-baha kala duwan. Waxay kaa caawin kartaa in aad xaalad dhinac kale ka eegtid oo aad hesho fikrad ah sidii aad wax uga qaban lahayd waxyaalo kugu adkaa, aadna wanaajisid xiriirka idinka dhexeeyaa adiga iyo ilmahaaga.

Buugyaruuhu marna ma aha «sida keliya ee saxda ah» ee carruurta loo barbaariyo, ee waxaa loogu tala galay in uu noqdo qalab kaa caawiya sidii aad waalidn-imadaada ugu kalsoonaan lahayd.

Waxaan kugu boorrinaynaa in aad buugyarahaa wax ku qoroto inta barnaamijuksocdo oo aad si firfircoona uga qaybbqaadato kullammada kooxda.

Soo dhowwoow!

Ma doonaysaa in aad wax badan ogaato?

Bogagga bufdir.no iyo foreldreverdag.no ayaad ka akhrisan kartaa warbixin intan ka badan oo ku saabsan xiriirka waalidka iyo carruurta.